

Balaarinta helitaanka Maalgashiga Xalaasha ah

Abriil 12, 2023

Dawlada Alberta waxay kala shaqaynaysaa Golaha limaamyada Alberta iyo Masaajidka Al Rashid sidii loo qiimayn lahaa fursadaha maal gashiga islaamiga ah, ama xalaasha ah.

Sanadkii 2022, dawlada Alberta ayaa soo saartay naqshada sharciga si loo siiyo ganacsiyada shardi dhaaf kooban oo ku aadan shuruudaha sharciga iyo xeerarka qaarkood, taasoo u sahlaya inay cilmibaaris iyo suuq gayn u sameeyaan badeecooyinkooda iyo adeegyada ku cusub suuqa.

Hadda, Muslimiin badan ayaan awoodin inay helaan maalgelinta daymaha guryaha ee caadiga ah oo ay baxshaan xarumaha dhaqaalaha ee sharciga ah, maadaama bixinta ama qaadista lacagta dulsaarka ah ay xaaraan ka tahay sharciga Islaamka. Maalgelinta xalaasha ah ayaa daynta guryaha siinaysa guryo iibsadeyaasha u qalma ayadoo la adeegsanaayo qarashaad iyo lacago badel u ah qarashaadka caadiga ah ee daynta guryaha.

Alberta ayaa dejisay farsamooyin si ay u taageerto abuurista maalgelinta xalaasha ah. Shardi dhaafka sharciga ee Alberta ayaa gacan ka gaysan kara abuurista maalgelin xalaal ah oo lagu dhaqan gasho si degdeg ah. Wuxuu sidoo kale abuurayaa fursad lagu xaqiijinaayo in isbadellada sharci ee loo baahan yahay ay waafaqsan yihiin sharciga Islaamka.

“Ka guddoomiye gobol ahaan, waxaa sharaf wayn ii ah inaan u doodo dhammaan bulshooyinka. Ayadoo la adeegsanaayo hanaanka hal abuurka leh ee Alberta ee lagu fududeynaayo daymaha guryaha ee xalaasha ah, dad badan ayaa awood u yeelan doona inay helaan adeegyada daynta guryaha ee gobalkaan. In Alberta ay noqoto meel ay fududahay in qofku ku dhaqmo kuna noolaado diintiisa ayaa qayb muhiim ah u ah dhisida Alberta nabadgalyo iyo sinaan ay ku haystaan dadka ka kala yimid daafaha caalamka kuwaasoo ku riyoonaaya nolol wanaagsan.”

Macluumaadka la xiriira

[Naqshada sharciga Alberta](#)

Weydiimaha saxaafadeed

Charlotte Taillon

charlotte.taillon@gov.ab.ca

780-932-5381

Xoghayaha Warfaafinta, Guddiga

Khasnajiga iyo Maaliyadda

Danielle Smith, Guddoomiyaha Gobolka

Codsadeyaasha sharci dhaafku waa inay buuxshaan shuruudaha adag ee helitaanka shardi dhaafka si loo xaqiijiyo ammaanka macaamiisha. Kadib marka cilimibaaris lagu sameeyo shardi dhaafka sharciga, dawlada ayaa ka shaqayn doonta abuurista isbadello dhanka sharciga ah oo u sahlaaya xarumaha dhaqaalaha ee Alberta inay baxshaan maalgelin xalaal ah. Tan ayaa ka dhigaysa Alberta gobalkii ugu horeeyay ee baxsha maalgelinta xalaasha ah oo uu baxsho bangi sharci oo heer gobal ah.

“Waxaa sharaf noo ah inaan diyaarino farsamooyin lagu taageeraayo dadka reer Alberta anagoo siinayna xalalka dhaqaale oo cusub sida abuurista maalgelinta xalaasha ah oo lagu helaayo shardi dhaafyada ku jira nidaamka sharci dhaafka.. Anagoo abuurayna hanaan sharci oo noocyo kala duwan leh, waxaan soo jiidan karnaa adeegyada dhaqaalaha ee cusub oo hal abuur leh oo kusoo biira gobalka anagoo haddana xaqiijinayna in dadka reer Alberta la difaaco.”

Travis Toews, Madaxweynaha Guddiga Khasnajiga iyo Wasiirka Maaliyadda

"Waxaan dhidibada u dhigaynaa daymaha guryaha oo xalaal ah oo laga dhaqan gasho Alberta si dadka Muslimiinta ah ay si fudud ugu helaan guryo qiimo jaban ayagoo maraaya isla shuruudaha daynta guryaha ee caadiga ah. Hindisahaan ayaa u sahlaaya bulshadeena fursad wayn oo ay ku helayaan maalgelin ayadoo la ilaalinaayo diinteena Islaamka."

Omar Mahmoud, guddoomiyaha, Golaha Imaamada ee Edmonton (ECI)

Xaqiiqooyinka kooban

- Shardi dhaafka sharciga, oo shaqaynaayay ilaa Luuliyo 2022, waa noocii ugu horeeyay oo ka dhaqan gala Canada, taasoo siinaysa Alberta fursad kale oo xiiso badan.
- Shardi dhaafyada sharciga ayaa laga dhaqan gashay aduunyada oo dhan si loogu adeegsado ganacsiyada iyo waaxaha dhaqaalaha ee kala duwan.
- Codsade kasta oo codsanaaya shardi dhaafka sharciga waa inuu:
 - si shaqsi ah u dagan yahay Alberta
 - uu baxshaa agabka ama adeegyada dhaqaalaha
 - waa inuu baxshaa badeecooyin cusub oo hal abuur leh gudaha Alberta
 - waa inuu keenaa qorshe ganacsi oo wanaagsan oo macquul ah
 - waa inuu buuxshaa shuruudaha, xeerarka ama xadidaadaha kale ee u degsan wasiirka dhaqaalaha si loo xaqiijiyo kormeer sax ah